

Arrimaha Qalliinka

BUKAANKA AAN LA SEEXINEYN

Isbitaalka Carruurta wuxuu ogsoon yahay in waxyaabaha aad filaneyso ay qoyskaaga u sahli karaan qalliinka, suuxinta iyo bogsashada. Arrimaha qalliinka waan kugu caawin doonaa. Farriimaha hoos ku qoran u isticmaal in ay kugu hagaan waxyaabaha aad u baahan tahay inaad ogaato intaadan ilmahaaga guriga ka soo kaxeeyn. Fadlan na weydii wixii su'aalo ah oo aad qabto.

1

Gacanta ayaa la iigu xiray calaamad oo kalkaaliso ayaan la kulmay

2

Waxaan gashaday dharkii jiiifka ee isbitaalka

3

Kalkaalisadu su'aalaha way dhageysataa; waan garaneyaa sidaan caawimaad ku heli karo markaan u baahdo

4

Waxaan la kulmay kooxdii qalliinka: dhakhtarkii, kalkaalisadii iyo kooxdii suuxinta

5

Wixii aan qabay oo ah su'aalo iyo welwel dhakhtarka ayaan kala hadlay

6

Kooxda qalliinka waxay eegeen calaamaddeyda gacanta ku dheggaan

7

Qalliinka ayaa la ii qaaday oo qoyskeygu way ogyihiin meesha ay igu sugi doonaan

8

Qalliinkii waa la sameeyey oo waan bogsoon doonaa

9

Qoyskeygii ayaan la joogaa oo waxaan cunayaa jalaato, waxaana cabbayaa casiir

10

Waxaa la is siiyey daawada xanuunka; waxaan dareemayaa farxad intii macquul ah

11

Kalkaalisada ayaa si aan fahmi karno noogu faahfaahisay daryeelka aan u baahnay ee aan guriga ku sameyn doono

12

Qoyskeygu waa ay garanayaan sababta daawadeyda, dhibka ka imaan kara iyo waqtiyada aan qaadan doono

★

Faleebbihii waa la iga saaray; waan labbis nahay oo guriga ayaan aadi doonaa

Qoraallo Kale:

- Qallin ka hor
- Qalliinka
- Bogsashada
- Qalliinka ka dib
- Daryeelka aad ku sameyneyso guriga kolkii aad aaddo
- Guriga ayaan aadi doonaa